



Warbixin loogu talaggalay waalidiinta oo ku saabsan suurtagalnimada ah, in waxbarashada hore (esiopetus) lagu dhigto dhanka internetka iyadoo la joogo meel ka baxsan goobtii barbaarinta, laga bilaabo 25.3.2020

Waalidiinta sharafta leh!

Waxaan carruurtiina siinaynaa fursadda ah in ay waxbarashada hore (esiopetus) ka qaybqaataan iyagoo guriga jooga ilaa iyo amar dambe. Ujeedada asaasiga ah ee laga leeyahay waxbarashada ka dhacaysa goob ka baxsan xaruntii waxbarashada, waa sidii loo ilaalin lahaa wadajirka kooxda iyo xiriirka ka dhexeeya kooxda waxbarashada hore.

Barnaamij maalmeed joogto ah, nidaam joogto ah oo ammaan ah, iyo wadaxiriirka kooxda ku jirta waxbarashada hore ayaa ah kuwo carruurta siinaya hawlmaalmeed farxad leh. Adinka ka waalid ahaan ayaana xal ka gaari kara illaa iyo muddo intee ah ayay carruurtiinu ka qayb qaadan karaan waxbarashada hore ee lagu qaadanayo dhanka internetka iyadoo uu qofku guriga joogo. Macallinka qaablisan waxbarashada dhanka internetka lagu qaadanayo ayaa idinla soo xiriiraya, islamarkaana si gaar ah idinkala hadli doona hawlaha waxbarashada dhanka internetka ah ee carruurtiinu ay ka qaybqaadanayaan.

Haddii xaaladdu isbeddesho,, sidoo kale tilmaanbixntaan xitaa waxaa dhici karta in ay wax iska beddelaan.

Mahadsanidin,

Sole Askola-Vehviläinen

Madaxa barbaarinta hore